# Animal Diseases & Their Treatments.



- **Cudurada ku dhaca xoolaha soomaalidu ay dhaqato iyo sida loo daaweeyo**

- Waxaa dib u habeyn lagu sameeyay book-gaan sanadkii:, 12/june/2019

## TUSMADA BUUGGA

### a) Cudurada bakteriyada dhaliso

1- Kud (anthrax)……………………………........................................................1
2- Garab gooye (black quarter)……………………….....................................3
3- Summow (botulism)………………………………….………………………...5
4- Beerfuran( bacillary haemogolobinuria)……………… ………………... 6
5- Teetano (tetanus)……………………………………….……………………7
6- Tiifoow (salmonilloisis) ama (thaiphod)…………............................. 8
7- Guux ( haemorragic septicemia) ama (HS)…………….……………….. 9
8- Caanoow (colibacillosis)…………………………….............................. 10
9- Urug ama xamad ama qaaxo (tuberculosis) ama (T.B)…………….. 11
10- Qunka loda (actinobacillosis)……………………….…………………….12
11- Shimbir( actinomycosis)ama( lumpy jow)……….……………………. 13
12- Dhicis (bovine brucellosis)………………….…………... ………………... 14
13- Af-burbur (oral necrobacillosis)…………………………………………... 16
14- Sanbab (C.B.P.P) ama (C.CP.P)…………………………….……………. 17
15- Dhal-reeb (bovin genital vibrosis)…………….……………………….. 18
16- Gale (bovine mastitis) …………………………………………….…….. 19
17- Cagaarshe ( leptospirosis )………………… ……………………………....21
18- Kalliya xanuun ( coryne bacterial infection)… ……………………….. 22



**book-gaan waxaa qoris iyo dib u habayn buuxda ku sameeyay Muhiadin Farah Gedi (mfg) oo ahaa ardayda wax kabartay jaamacadda ummadda soomaaliyeed gaar ahaan kuliyada caafimadka xoolaha. (Bachkii 3aad)**

**B) cuduradad virus-ka dhaliya**

1- dabakaruub (rinderpest)........................................................... 23

2- cabeeb (foot and mouth disease)............................................ 25

3- carab madoobaad( blue tongue)............................................27

4- xummadda dooxada (rift valley fever)................................. 38

5- waaf gaanbada lo'da ( lumpy skin disease)........................................ 30

6-furuqa lo'da (cowpox)...................................................................31

7- raabiyo (rabies virus)........................................................................ 32

8- Jabtada lo'da (epivaginitis)..........................................................33

9-joogo ama joogtoy (three days sickness)........................ .......................34

**c) Rickettsia (cudurada shilinta ambylomada keento)**

1- Wadna biyood (heart water disease)................... ....................35
2- Minbarar ama yibir (Q.. fever)...............................................37

**d) Cudurada protozoa-da (protozoa disease)**

**1-** Gosha geela iyo maroodiga (surra)...............................................38
**2-** Gosha dameeraha iyo fardaha ( durine)..........................................40
**3-** Uur dhiig( cocidoisis)...........................................................................41
**4-** Garbab (east coast fever Teliariosis)...................................................42
**5-** Kaadi dhiig bovin (babesiasis )................................. ..........................43
**6-** Baal ama muqlay (anaplasmosis)...........................................................44

**e) Cudurada fugus-ka keeno (fungus disease)**

1- Cambaar ama goosi ( Ringworm)........................................................45
2- Cadho (bovine cuntaneous streptoricosis)..........................................46

**f) Cudurada uu keeno gooryaanka (endoparasites).**

1- gooryaanka qaabka goobada u eg (round worms)...................................47
2- Gooryaanka aan maraaraha lahayn (flukes)....................................... 50

## 1. CUDURADA AY BACTERIYADA KEENTO

## (BACTERIAL DISEASES)

### 1- kud (Anthrax)

1- **Hordhac**

Cudurka kudka looyaqaan waa cudur dhaqso wax u dila mararka qaarna daaha xummad fara badan leh ee ku dhaca xayawaanka dhiigga diiran iyo dadkaba,

2- (Zoonotic) waxaan astaan u ah xayawaanka uu ku dhaco in ay beer kayaradu bararto, kadibna uu dhinto.

3- **Cudurkaan waxa sababa (Aetiology).**

Cudurkaan waxaa keena bakteeriya loo yaqaan (bacillus Anthraces) waana bakteeriya (gram -positive ) waxayna isku haystaa qaabka silsilada mar marka qaarna labo labo ama hal hal.

4- **Habka cudurkaan ufido (Transmission).**

Cudurkaan waxa uu ufidaa siyaabo kala duwan oo ah:,

a) Neefka ama xayawaanka qaba cudurkaan oo laga qaado
b) In lacuno wax kayimid xayawaanka qaba cudurkaan
c) Waxyaabaha xoolaha kayimaada sida lafaha shiidan, dhogorta xoolaha, saxarada iyo uuska sidoo kale waa laga qaadaa.
d) Cudurkaan waxaa kaloo keena ama fidiyah shimbiraha cuna bakhtiga neefka uu dilay cudurkaan.
e) Cudurkaan waxaa kale oo fidiya qaniinyada tixsiga iyo cayayaanada kale.

**4- Astaamaha cudurkaan (Symptoms)**

Cudurkaan astaamihiisu way kala duwan yihin waxayna ku xiran tahay xayawaanka uu ku dhaco,

a) Cudurkaan waxa uu kusoo muuqdaa 3-5 maalmoood
b) Isbadal dag dag ah oo neefka kudhaca.
c) Neefsiga oo ku adkaada neefka.
d) Neefka oo dhaqaaqi waaya mararka qaarkood waxaa la arkaa xoolihii qaar kamid ah oo ku dhintay xerada dhexdeeda.
e) Heer kulka jirtka oo gaara 40 -42℃
f) Cuntada oo uu cuniwaayo neefku

g) Sanka oo dhiig kayimaado marka uu neefku dhinto
h) Beerkayarada neefka oo bararta.

**5-Daaweynta cudurkaan (Treatment)**

Cudurkaan waxaa lagu daaweyn karaa **pencilline, oxytetracycilin** iwm.

**6- Ka hortag cudurkaan (Prevention)**

a) In xoolaha laga talaalo cudurkaan sanadkii laba jeer
b) Iyo in sanadkiiba mar laga tallaalo cudurkaan oo lasiiyo tallaalada kudka
c. In laduugo neefka cudurkaan uu dilay isla markaana lagubo meesha uu kudhintay.



Muuqaalka bakteriyada keenta cudurka kudka

## 2) Garab gooye (Black Quarter).

1. **Hordhac**

   garab gooye waa cudur si dhaqso ah wax u dilla oo aan tabasho lagu kala qaadin ee ku dhaca **lo'da** iyo idaha, waxaan lagu yaqaan murqaha dhaqdhaqaaqa oo barara wuxuuna aad udilaa ubadka **lo'da** ee da'doodu u dhaxayso labo bilood ilaa iyo laba sano jir.

2. **Cudurkaan waxaa keena (Aethiology).**

Cudurkaaan waxaa keena bakteriya loo yaqaan (Clostridium Chauvoei) waana nuuc ka-mid ah bakteriyada ( gram positive ) waxayna leedahay qaabka usha oo kale.

3. **Habka uu ufido cudurkaani (Transmission).**

Cudurkaan waxa uu ufidaa;.

   a. Hadii uu cuno neefka fiyoow wax kayimid neef jirran sida diif, saxaro, dhareer, iwm
   b. Idaha waxay kukala qaadaan birta wax lagu kormo iyo maqasyada loo adeegsado idaha.

4. **Astaama cudurkaan (Symptoms)**

Cudurkaan astaamihiisa waxaa kamid ah

   a. Heer kulka jirla oo kaca ee gaara 41℃
   b. Neefsashada oo ku adkaata neefka
   c. Neefka oo lugaha kajiisa murqaha labada garbood korkooda ama sinaha korkooda oo bar yar oo barar ah kasamaysmo, taas oo marka hore xanuunto isla markaana kulayl ah hadii lataabto, marka danbana isku badasha gal yar oo ay hawo kujirto oo aan xanuun lahyayn.
   d. Qaabka uu ugu dhaco idaha waa qaab nabarro ah kuwaas oo ka soo baxa dhamaan jirka oo dhan.

5. **Kahortaga cudurkaan (Prevention)**


   a. Waxaa looga hortagaa cudurkaan in la tallalo ubadka lo'da markey jiraan lix bi-lood
   b. In latallaalo idaha da' kasta oo ay jiraan In lagubo neefka cudurkaan u dhintay meesha uu kudhintay markaasna god lagu aaso neefka dhintay

6. **Daa waynta cudurkaan (Treatment)**

Cudurkaan waxaa lagu daawayn karaa

a. Penicillin
b. Aureomycin

c. Ama serum lagu duro neefka billowga hore ee cudurkaan markuu kudhaco.



Muuqaalka bakteeriyada keenta cudurka kudka

## 3-Sumoow (Botulism)

1- **Hordhac**

Sumoow waa cudur keena sumoow deg deg ah ee xoolaha ku dhaca iyo dadkaba, waxaan laga helaa bakteeriyada keenta waxyaabaha xoolaha kayimaada ee qurmay iyo dhirta, waxaan astaan u ah in uu neefku ay taagmaan guud ahaan murqahiisa, isla markaan uu dhaqaajin waayo gawsaha, iyo neefka oo wax liqi-waya.

1- **Cudurkaan waxaa sababa ( Aetiology )**

Cudurkaan sumoowga waxaa keena bakteeriya loo yaqaan( clostridium botulism A.B.C.D)

2- **Habka uu u fido cudurkaan (Transmission)**

a) Cudurkaan waxaa laga qaadaa baqtiga xoolaha qurmay
b) Waxyaabaha laga sameeyo xoolaha sida hilibka gasacadaysan oo qurmay.
c) Waxaa kaloo laga helaa cuntada quruntay.

3- **Astaamaha cudurkaan (Symptoms)**

a) Cudurkaan waxaa astaan u ah murqaha uu dhaqaanjin waayo neefka
b) Aragtidiisa oo xumaata neefka
c) Calaalinta oo ku adkaata iyo baryaqaadka
d) Tabar daro guud ahaan oo ku timaada neefka

4- **Daaweynta cudurkaan (Treatment)**

A) Cudurkaan waxaa lagu daaweeyaa oo kali ah marka uu bilow yahay (anti-toxin) daawada loo yaqaan sida (penicillin G)

5- **kahortaga ( Prevention)**

a) Cudurkaan waxaa looga hortagaa in xoolaha laga dhawro cuntada quruntay
b) In xoolaha iyo dadka oo laga ilaaliyo hilibka gasacadeysan ee qurmay
c) In xoolaha la siiyo macdanta (phosphorus ) si ay ugu yeeshaan difaaac cudur-kaan aan soo sheegney

## 4- Beerfuur (Bacillary Haemoglobinuria)

1. **Hordhac**

   Cudurkaan beerfuurka waa cudur deg deg wax u dila ee faafa ee ku dhaca lo'da iyo idaha kaaso keena in neefku beerka ka bararo

2. **waxaa keena cudurkaan (Aetiology )**

   Cudurkaan beerfuurka waxaa keena bakteeeriya loo yaqaan (clostridium hemolyticum) waana bekteeriya (gram positive) ee difaaca sameysata marka ay dibada timaado

3. **habka uu u fido cudurkaan (Transmission)**

   Cudurkaan waxaa keena gooryaanka gala beerka (liver fluke)
   Neefka oo cuna wax kayimid neefka cudurkaan qaba

4. **Astaamaha cudurkaan (Symptoms)**

   Cudurkaan astaamihiisa waxaa kamid ah;.

   a) Cuntada oo uu cuni waayo neefka
   b) Neefka oo barya naqsan waaya
   c) Neeefka oo sameeya neef gur badan
   d) Kaadidiisa oo noqota guduud madow kujiro
   e) Fuuq bax ku yimaada neefka iyo dhiig la'aan
   f) Heerkulka jirka neefka oo kaca

5. **daawaynta cudurkaan(Treatment)**

   cudurkaan waxaa lagu daawayn karaa ayadoo neefka lagu duro

   a) Oxytetracyclin
   b) penicillin

6. **kahortaga cudurkaan (Prevention)**

   a) in lasiiyo talaalka cudurkaan xoolaha sadexdii biloodba mar.
   b) ama in lasiiyo tallaal lixdii biloodba mar.

## 5- Teetano (Tetanus)

1. **Hordhac**

   Teetanada waa cudur dhaqso wax u dila ee faafa ee aan xumad lahayn ee ku dhaca dadka iyo xoolahaba (zoonosis) waxaan lagu yaqaanaa murqaha oo taagma iyo hooskiisa oo uu kacararo neefka ama qofka.

2. **Cudurkaan waxaa keena (Aetiology)**

Cudurkaan waxaa keena bakteeriya loo yaqaano (clostridium tetani) taasoo soo saarta laba nuuc oo dheecaan oo sun ah.

   a. Tetanolysin,
   b. Tetanospasmin, labdaan nuuc inta badan waxaa lagahelaa dalalka kulaylada ah

3. **Habka uu ufido cudurkan (Transmission)**
   a. Cudurkaan waxaa laga qaadaa dhaawac ama nabar ku dhaca xoolaha iyo dadka inta badana kayimaada biraha.
   b. Nabaro horey ugu dhacay xoolaha iyo dadka hadii ay gaaran dhaawac labaad iyadoo meeshii ay bogsoon ama raysan cudurkaan waa imaan karaa.

4. **Astaamaha cudurkaan (Symptoms)**
   a. Astaamaha cudurkaan waxaa kamid ah neefka ama qofka oo ay murqaha taagmaan
   b. Neefka oo lugahiisu kalataagmaan
   c. Neefka oo dhabarka taagma
   d. Neefka oo ka carara hooskiisa
   e. Neefka oo labada daan dhaqaajin waaya ama wax calalin waaya
   f. Calaamadda ugu horeysa ee cudurkaan markii lagu arko inta badan wuu dhintaa neefka todoba maalin kadib

5. **Daaweynta cudurkaan (Treatment)**
   a. Cudurkaan waa lagu daaweeyaa caddad fara badan oo (antitoxin) ah
   b. Penicillin waa lagu durikaraa neefka qaba teetanada
   c. Terramycin waa loo isticmaali karaa

6. **Kahortag (Prevention )**
   a. Cudurkaan waxaa looga hortagi karaa in lixdii biloodba mar laga tallaalo cudurka teetanada dadka iyo xoolaha

b. In lasiiyo (antitoxin) marka larabo in xoolaha iyo dadka lagu sameeyo qaliimo yar yar .

## 6- <u>Tiifow (Salmonillosis) ama (Thaiphod).</u>

1- **Hordhac**

Cudurkaan tiifowga waxaa keena faracaa bakteeriyada loo yaqaan salmuniila wuxuuna kudhacaa xayawaanka iyo dadka waana cudur dag dag wax udila mararka qaarna aad u daahiya waxaana lagu yaqaana tabar daro shuban badan oo dhiig lasocdo.

2- **Cudurkaan waxaa keena (Aetiology )**

Cudurkaan waxaa keena in kabadan todobaatan iyo shan nooc ee jinsiga (salmonella) waxaana kasoo qaadaneynaa afar nuuc oo dadka iyo xoolaha kudhaca .

a. Salmonella typhimurium.
b. Salmonella interistids.
c. Salmonella dublen.
d. Iyo salmonella new port.

Salmonella typhimurium, waa tan dadka kudhacda taas oo ay keenta sumowga cuntada dadku cuno.

Salmonella new port, waxaa ay ku dhacdaa inta badan ubadka yar yar ee lo'da.

Labada danbe ee soo hartay iyo inta aanan soo sheeginba waa kuwa kudhaca dhamaan nuuc kasta oo xayawaan ah

3- **Habka uu ufido cudurkaan (Transmission)**

a. Cudurkaan waxaa laga qaadaa cuntada iyo biyaha uu gaaray neef cudurka qaba wax kayimid.
b. Waxaa kaloo cudurkaan gudbiya shimbiraha iyo xamaaratada qaarkood
c. Cudukaan mararka qaaarna waxa uu kayimaada deegaanka ay xooluhu kunoolyihiin.

4- **Astaamaha cudurkaan (Symptoms)**

a. Heer kulka jirka oo gaara 42℃
b. Shuban labada maalmood ee ugu horeysa ee cudurku neefka kudhaco.
c. Culayska neefka oo is dhimo
d. Shuban oo dhiig lasocdo waana marka cudurkaan gaaro afar bari

5- **Daawaynata cudurkaan (Treatments)**

a. Waxaa lagu daaweeyaa daawada looyaqaan (sulphadimidine) oo si joogta ah afka laga siiyo neefka
b. Iyo inlagu duro neefka (chlorophenicol)

**6- Kahortaga cudurkaan (Prevention)**

a. Cudurkaan waxaa looga hortagi karaa in aad looga taxadaro nadaafada cuntada iyo biyaha xoolaha iyo dadku cabaan
b. In mararka qaar laga talaalo xoolaha cudurkaan tiifowga.

## 7- Guux (Haemorrhagic Septicaemia) ama (H.S)

**1- Hordhac**

Cudurkaan guuxa waa cudur kudhaca lo'da iyo lo'ginsiga mararka qaarna waxa uu kudhacaa geela, fardaha, doofaarka iwm. meelaha uu kadhacana waxaa kamid ah afrikada dhexe iyo afrikada bari, waana cudur dag dag wax udila.

**2- Cudurkan waxaa keena (Aetiology)**

Cudurkaan waxaa keena bakteeriyada looyaqaan (psaturella multocida)

A) Gaar ahaan nuucyada (6:B iyo 6:E )

B) Iyo nuuca dhiiga dabaasha ee 1:B ee aragtida Charles iyo kooxda Robert oo wada jira

**3- Habka uu ufido cudurkaan (Transmission)**

a) Cudurkaan waxa uu dhacaa xiliyada abaarta ah iyo roobka maalmaha hore ee dhulku qoyo ee ay xooluhu daaq haystaan

b) Cudurkaan waxa uu kufidaa oo kale in uu neeefka fiyoow cuno wax kayimid neef jiran oo ku jira biyaha ama cuntada ay xooluhu cabaan ama cunaan

c) Qaniinyada shilinta iyo cayayaanka way u kala gudbiyaan cudurkaan xoolaha .

**4- Astaamaha cudurkaan (Symptoms)**

a) Astaamaha cudurkaan waxaa kamid ah xanuun dag dag ah oo neefka qabta

b) Heerkulka jirka neefka oo gaara 42.5°C

c) Qunfac iyo sanbaba xanuun oo neefka lagu arko

d) Neefka oo xoola goonni uga istaaga

e) Dhiif farabadan iyo shuban oo neefka kayimaada

f) Neefka oo kabarara qoorta agagaarkeeda meel kamid ah

g) Neef siga oo ku adkaada neefka

**5- Daaweynta cudurkaan (Treatments)**

a) Cudurkaan waxaa kaliya oo lagu dilikaraa bakteeriyadiisa qaab tallaal ah

**6- Kahortaga cudurkaan( Prevention )**

a) In lasiiyo xoolaha tallaalka looyaqaan (H.S vaccine) sanad walba

b) In laga hortago wax kasta oo keeni kara sanbab xanuun si cudurkaan looga hor tago.

## 8- Caanow (Colibacillosis)

**1- Hordhac**

Cudurkaan caanowga waxa uu kudhacaa ubadka xoolaha iyo dadka ee yar yar da'doo-duna u dhaxayso maalinta uu dhasho ilaa lix bilood waxaana lagu yaqaana calool majiir, shuban iyo dheef shiidka oo yar, ama ilmaha yar oo sumooba.

**2- Cudurkaan waxaa keena (Aetiology)**

Cudurkaan waxaa keeena bakteeriyo looyaqaano (escherichia colic ama E coli )
Taas oo wax yeesha xiidmaha ama mindhicirada xoolaha iyo dadka kuwaasoo si-idaaya sunta wax yeelaysa mindhicirada ama xiidmaha, waxana looyaqaan

a) Entric collibacillosis
b) Intertoximic collibacilllosis
c) Septicemic collibacillosis

**3- Habka uu u fido cudurkaan (Transmission)**

a) Cudurkaan waxuu ku yimaadaa xayawaanada yar yar ama ilmaha oo qaata caano xad dhaaf ah ama danbar badan
b) Ubadka xoolaha oo badan oo layskugu geeyo xero cariiri ah
c) In kagu xiro ubadka meel qorax ah
d) In ubadka xooluhu cabbaan biyo ama cunaan cunto wasaqeysan

**4- Astaamaha cudurkaan (Symptoms)**

a) Cudurkaan astaamihiisa waxaa kamid ah ubadka yar ee xoolaha oo miyir beela.
b) Xanuun boga kaqabta iyo shuban dag dag ah
c) Lugaha oo uu ka bararo iyo jiisnimo kutimmada socodkiisa
d) Qunfac mararka qaarna isku badala cudurka looyaqaano (meningitis)

**5- Daaweynta cudurkaan (Treatments)**

a) Oxytatracyclin
b) Streptomycin

**6- Kahortaga cudurkaan [Prevention)**

a) Cudurkaan waxaa looga hortaga in ubadka xoolaha lagu xiro meel nadiif ah hoos iyo hawo fiicana leh.
b) In laga ilaaliyo ubadka xoolaha in meel ciriiri ah layskula xiro
c) In loo kala duwo meesha ay ku xiran yihiin iyo meesh cuntada iyo biyaha lagu si-iyo.

## 9- Urug , qaaxo ama xammad (Tuberculosis T.B)

**1- Hordhac**

Cudurkaan urugta waa cudur lagu kalaqaado taabashada ee dhaqsaha wax udilin waxa uu kudhacaa laf dhabarleeyda waxaana keena bahda looyawaan (**mycobacterium**) ku-waas oo sameeyo nabaro kasoo baxa qanjirada, sanbabka, mindhicirka, ama xiidma, beerka, beerkayarada iyo xubna kale.

**2- cudurkaan waxaa keena (Aetiology)**

Cudurkaan waxaa keena bakteeriya loo yaqaan (mycobacterium tuberculosis) waxaana larumaysan yahay in ay tahay sadex nuuc sida;.

a) Nooca dadka ku dhaca
b) Nooca lo'da kudhaca
c) Nooca shimbiraha kudhaca

Labadaan nuuc ee kore ee kudhaca naasleeyada aad ayay isugu dhow yihiin marka loo fiiriyo nuuca shimbiraha

**3- Habka uu u fido cudurkaan (Transmission )**

a) Cudurkaan waxaa lagu kala qaadaa neefsiga
b) Shahwada rimi-gacmedka xooluhu way ku kala qaadaan.
c) Naasa galiska xooluhuna way kukala qaadaan
d) Biyaha iyo cuntada way kukala qaadaan xoolaha hadii mid jiran uu ku hor marro cu-nidda ama cabidda.

**4- Astaamaha cudurkaan (Symptoms)**

a) Qaybta sanbabada waxaa lagu yaqaan qunfac mudo dheer haya neefka
b) Barar qanjirada iyo sanbaba xanuun
c) Sambabada oo lagu arko nabaro teel teel ah
d) Marka ay ku dhacdo habdhiska dheef shiidka mindhicirada ayaa lagu arkaa nabaro waaweeyn oo kuus kuusan inta badan dheef shiidka hor istaaga shaqadiisa
e) Nabaro kasoo baxa beerka yarada, hunguriga cad iyo mindhicirkaba

**5- Daaweynta cudurkaan (Treatments)**

a) Cudurkaan waxaa lagu daaweeya (isonizid)
b) Streptomycin iyo para- amino salicylic acid

**6- Kahor tag (Prevention)**

a) In lasiiyo xoolaha tallaalka( B.C.G) iyo in laga saaro xoolaha neefkii curukaan lagu arko

## 10- <u>Qunka lo'da (Actino Bacillosis)</u>

1- **Hordhac**

Cudurkaan Qunka lo'da waa cudur faafa ee ku dhaca lo'da waxaana lagu yaqaan nabaro kasoo baxa carabka qeybtiida danbe, nabaradaas oo keena barar wadagaara qanjirada dhuunta oo dhan, mararka qaarna u gudba habdhiska dheef mareeenka iyo sanbabada.

2- **Waxaa keena cudurkaan (Aetiology)**

Cudurkan waxaa keena (actino bacillosis fungus) kaas oo lagu tiriyo bakteeriyada waxaana loo yaqaan (A.B lignieresi) kaasoo ku sameeya xubnaha jilicsan nabaro maal ku jirto

3- **Habka uu u fido cudurkaan (Transmission)**

Cudurkaan waxa uu u fidaa marka ay xooluhu daaq sanayaan ayuu cawsku soo dhexgalaa nooluhu kadibna markaa ay liqaan xuubka maqaarka ayuu dilaaciya kadibna sidaas ayuu neefku ugu dhacaa cudurkaan

4- **Astaamaha cudurkaan( Symptoms)**

a) Cudrkan waxaa lagu yaqaan xanuun dag dag ah oo carabka iyo dhuuntada ku yimaada
b) Calaaliska iyo laqida oo neefka ku adkaata
c) Carabka neefka oo barara isla markaana ay adkaato qaybtiisa danbe
d) Dibiro oo neefka ku timaaado mararka qaarkood
e) Caloosha oo waynaata neefka mararka qaarkood, waana marka uu cudurku u gudbo habdhiska dheef shiidka

5- **Daaweynta cudurkaan (Treatments)**

a) Xididka oo laga siiyo cusbo (sodium salt) toban ilaa iyo afar iyo toban maal-mood 1000cc
b) In kagu dhayo carabka salkiisa iyo dhuunta (sodium iodide)

6- **Ka hor tag (Prevention)**

a) In laga taxadaro daaqa xooluhu ay daaqaan meel aanu ku badneeyn geedaha iyo cawska qodaxda leh
b) In xoolaha lasiiyo caws jilicsan oo aan waxyeello u geysaneyn xoolaha.

## 11- <u>Shibiroow (Actino mycosis) (Lumpyjow)</u>

**1- Hordhac**

Cudurkaan shimbirka waa cudur muddo dheer haya xoolaha ee kudha labada daan ee xoolaha waxaana astaan u ah in ay nabarro kasoo baxaan habdhiska dheef mareenka iyo habdhiska neef sashada.

**2- Cudurkaan waxaa keena (Aetiology)**

Cudurkaan waxaa keena (fungus) oo lagu tiriyo bakteeriyada kaasoo gala habdhisyada dheef mareenka iyo habdhiska neef sashada.

**3- Habka uu ufido cudurkaan (Transmission)**

a) Cudurkaan waxa uu u fidaa iyadoo neefku uu cuno caws ee noolahaan uu ku jiro ee kayimid neef qaba cudurkan marka uu afka galana wuu dilaaacaa xuubka sare ee afka dhexdiisa, kadibana dhiiga ayuu u gudbaa

b) Ilkaha oo qaar kamid ah jajaba (sida haduu neef gees ku dhifto neefkale)

**4- Astaamaha cudurkaan (Symptoms)**

a) Labada daan oo ay kasoo baxaan nabaro isla markaana barara

b) Mudo kadibna bararku waxa uu keena xanuun oo aan lataaban Karin

c) Callalinta oo dhibta neefka

d) Ilkaha qaarkood oo kadhaca neefka

e) Dheecaan jaalle ah oo kayimaada cirridka iyo ilkaha salkooda danbe

f) Nabarada mararka qaar waxay kusameysman jirka kale

**5- Daaweyna cudurkaan (Treatments)**

a) Cudurkan waxaa lagu daaweeyaa (sodium salts) oo xididka laga siiyo 1000cc 10-14 maal mood

b) In lagu dhayo nabarda (potassium iodide) ama (sodium iodide)

**6- Ka hortagga cudurkaan (Prevention)**

a) Cudurkaan waxaa looga hortagaa in xoolaha laga illaaliyo waxyaaba keena qaraxa ilkaha ee adag sida lafaha iwm

b) In xoolaha laga illaaliyo geedaha iyo cawska qodaxda leh.



muuqaalka neef shimbir kudhacay

## 12- Dhicis (bovin Brucellosis)

1- **Hordhac**

Cudurkan dhiciska waa cudur keena dhicis billaha danbe ee uurka lix ilaa sadex billod wuxuuna ku dhacaa dadka iyo xoolaha waaweyna weyna isku gudbiyaan dadka iyo xooluba.

2- **Waxaa keena cudurkaan (Aetiology)**

Cudurkaan waxaa keena bakteeriya loo yaqaano (brucella abortus) taas oo (gram positive) ah waxa ayna gashaa dhiiga cas (red blood cells) ee nafleeyda ay ku dhacdo

3- **Haka uu ufido cudurkaan (Treansmition)**

a) Cudurkaan dhiciska waxaa layskugu gudbiyaa xayawaanka jiran mandheertiisa iyo cunuga dhiciska ah hadii uu gaaro neef fiyoow
b) Kaadida neef qaba hadey gaarto neef fiyoow
c) Haday isku tagaan labka iyo dhadiga way kala qaadaan hadii cudurka mid kood uu qabo
d) Waxaa kale oo laga qaadaa caannaha neefka qaba cudurkaan
e) Waxaa kale oo laga qaadaa shahwada dibida laga qaado hadii ay qabaan
f) Hadii lacuno wax kayimid neefka qaba cudurkaan sida hilibka, caanaha iyo iwm.

4- **Astaamaha cudurkaan (Symptoms)**

a) Astaamaha cudurkaan lagu yaqaan waxaa kamid ah xoolaha dhadiga ah in ay kabararaan candhada afar markii loo qaybiyo halqeyb, 14-bari kadibna dhamaan candhada wada gaaro
b) Cudurkaan waxaa lagu yaqaan xerada uu soo galo in ay kadhiciyaan boqolkiiba labaatan (20%) xoolaha riman.
c) In ay xooluhu rimiwaayayaan mudo dheer isla markaana xoolaha labka ah waayo hami ama rabitaan jinsiga dhedigga.


5- **Daaweynta cudurkaan (Treatments)**

a) Cudurkaan waxaa lagu daaweeya daawooyinka sida sulphodiazine
b) Streptomycin iyo eyromycin taasoo joojisa inuu cudurku faafo ama raaaco shahwada dibida lab iyo caanaha xoolaha dhadiga ah ee irmaan

6- **Kahortaga cudurkaan (Prevention)**

a) Cudurkaan waxaaa looga hortagaa in laga talaalo xoolaha cudurkaan

b) In ciribtir lagu sameeyo ayadoo la adeegsanaayo siyaabo kala duwan
c) In aan la iib geeyn xoolaha aan wadan shahaada caafimaadka xoolaha
d) In aan lakeenin neef qaba cudurkaan waxyaabaha kayimaada sida hilibka iyo caanaha suuqyada wax lagu iibsado
e) In laga mamnuuco kawaanada in lagu qalo xoolaha aan caafimaadkooda la hubin



Muqaalka bakteeriyada keenta dhiciska

## 13- Af-burbur (Oral Necrobacillosis)

1- **Hordhac**

Cudurkaan af-burburka waa cudur ku dhaca lo'da iyo ariga oo gala agagaarka afka waxaana lagu yaqaanaa xummad badan iyo nabaro bararan wareega afka

2- Waxaa keena cudurkaan (Aetiology)

cudurkaan waxaa keena bakteeriya loo yaqaan (sphaerophorus necrophorus)

3- **Haka uu u fido cudurkaan (Transmission)**

a) Sida aan ognahay bakteeriyada way kujirtaa carrada gaar ahaan meelaha qoyan waxayna gashaa jirka xoolaha kadibna way kufidaa
b) Waxaa sidoo kale keena geedaha qodxaha leh oo ay xooluhu daaqaan
c) Waxaa kale oo cudurkaan keena hadii ay xooluhu ku yaraadaan vitaminada

4- **Astaamaha cudurkaan (Symptoms)**

a) Cudurkaan waxaa astaan u ah dhareer farabadan oo kayimaada neefka afkiisa
b) Nabaro leh xanuun iyo barar afka agagaarkiis gaar ahaan qeyta hore ee afka
c) Neefka oo cuntada cuni waaya
d) Miyir la'aan ku timaada neefka
e) Heer kulka jirka oo kaca
f) Dhuunta iyo carabka salkiisa oo mararka qaar ay nabaro ku fidaan

5- **Daaweynta cudurkaan (Treatments)**

a) Cudurkaan waxaa lagu daaweeeyaa afka oo laga siiyo neefka daawada loo yaqaan sulphadimidine
b) Penicillin
c) Iyo oxytatracycillin

6- **Kahor taga cudurkaan (Prevention)**

a) Cudurkan waxaa looga hortagaa in la ilaaaliyo nadaafadda cuntada iyo biyaha ee xoolaha
b) In lasiiyo tallaal xoojin ah cudurkaan af bur-burka looga hortago

## 14- Sanbab (C.B.P.P) AMA (C.C.P.P)

**1- Hordhac**

Cudurkaan sanbabaka waa cudur aykeento bakteeriya dag dag wax udisha marka qaarna daahiya ee ku dhacda lo'da iyo ariga waxaana lagu yaqaana isaga oo kusameeya nabaro sanbabada neefka

**2- Waxa keena cudurkaan (Aetiology)**

Cudurkaan waxaa keena bakteeriya loo yaqaan (mycoplasma mycoides) waana bakteeriyada ugu badan ee wax yeelada u geydata sanbabada xoolahaha

**3- Haka uu ufido cudurkaan (Transmission)**

a) Cudurkaan waxa uu ufidaa iyada oo ay isku neefsadaan neefka jiran iyo midka caafimadka qabo

b) In neefka fiyoow cuno ama uu cabo shey uu gaarey wax kayimid neefka qabo cudurkaan

**4- Astaamaha cudurkaan (Symptoms)**

a) Cudurkaan waxa uu kusoo muuqdaa 7-27 maalmood

b) Heer kulka jirka neefka oo gaara 41℃

c) Qunfac dag dag ah oo neefka ku yimaada

d) Maal katimaada sanka iyo afka neefka

e) Xabadka iyo caloosha oo neefku kabararo

f) Qunfac dag dag ah oo yimaada markii neefka hawo qaboow ah ku dhacdo

**5- Daawada curkaan (Treatments)**

a) Cudurkaan waxaa lagu daaweeya (cloromycin) oo lagu duro

b) Oxytetracycline

**6- Kahor taga cudurkaan (Prevention)**

a) Cudurkaan waxaa looga hortagaa in laga tallaalo sanad walbaa xoolaha





waa muuqaalka neef lo'ah ee cudurka sambabka qaba iyo sanbabadiisa markii laqalay kadib

## 15- Dhal-Reeb (Bovine Genital Vibrosis)

1- **Hordhac**

Cudurkaan dhal-reebka waa cudur qaab ahaan bakteeriya jilicsan ah wuxuuna ku dhacaa lo'da iyo xayawaano kale oo ah dab jog iyo duur joog waxaana lagu yaqaan in ay lo'da dhadigga in ay rimi waayaan ama ay soo dhiciyaan bilaha hore ee uurka

2- **Waxaa keena cudurkaan (Aetiology)**

Cudurkaan waxaa keena bakteeriya loo yaqaano (vibriofetus venerealis) taas oo lagu tiriyo in uu aad ugu nugul yahay xayawaanka bakeeylaha loo yaqaan

3- **Haka uu cudurkaan u fido (Transmission)**

a) Cudurkaan wuxuu u fidaa in ay isu tagaan lab iyo dhadig midkood uu qabo cudurkaan
b) Qalabka lagu qaado shahwada dibida (artificial insemination) xooluhu way ku kala qaadaan
c) Xooluhu meelaha ay fariistaan way kukala qaadaan

4- **Astaamaha cudurkaan (Symptoms)**

a) Cudurkaan waxa uu ku soo muuqdaa 7-50 maalmod
b) In ay soo ridaan xoolaha riman ee dhidigga ah boqolkiiba toban ama labaatan 10%-20% bilaha hore ee rimayga
c) In laga helo agagaaarka xubinta taranka ee dhidigga vagina nabaro yar yar oo badan
d) In dibida xerada ku jirah laga waayo rabitaanka sinjiga dhidigga.

5- **Daaweynta cudurkaan (Treatment)**

a) Cudurkaan waxaa lagu daaweeya iyadoo lays kugu daro neefka qaba cudurkaan neomycin iyo erythromycin

6- **Ka hortaga cudurkaan (Prevention)**

a) Cudurkaan waxaa looga hortagi karaa in caafimaadkooda la hubiyo dibida lo'da kujira todobaadkiiba laba jeer
b) In aan xerada lagu soo darin dibi aan laga hubin cudurkaan
c) In la ilaaliyo nadaafada qalabka looga shaqeeyo xoolaha sida maqasyada birta wax lagu kormiyo iwm
d) In lasiiyo xoolaha da'walba leh tallaal wax tar leh si cudurkaan looga hor tago.

## 16- Gale ama candha-bararka lo'da (Bovine mastisis)

1- **Hordhac**

Cudurkaan galahu waaa cudur qanjirada candhada iyo naasaha xoolaha iyo dadka, waxaana lagu yaqaan barar ku yimaada qanjirada candhada agagaarkeeda iyo naasaha

2- **Waxa keena cudurkaan (Aetiology)**

Cudurkaan waxaa keena si wada jir ah

a) Bakteeriya (Streptococcus Agalactiae) iyo (Streptococcus Uberis)
b) Fungiga (trichosporn S.P.P)
c) Iyo yeastiga (candida S.P.P)

3- **Habka uu cudurkaan u fido (Transmission)**

a) Cudurkaaan waxaa fidintiisa ka qeyb qaata dadka gacmahooda xoolaha kulisa iyagoo neef jiran gacanta ku soo maalay ayay mid fiyoow ku lisaan gacmahoodiina jeermigii kadillin sidaas ayuuna u fidaa cudurkaan
b) Waxaa kale oo laga qaadaa cudurkaan in neefka irmaan uu fariisto meel wasakha badan oo jeermigii ayaa naasaha ibtooda gala
c) Waxaaa kale oo keena cudurkaan cayayaanka sida diqsiga waa ka qeyb qaataa fiditaanka cudurkaan

4- **Astaamaha cudurkaan (Symptom)**

Cudurkaan waxaa uu u qabtaa xoolaha laba siyaabood, si dag dag ah iyo si aan dag dag aheyn, hadii aan soo qaadano qaabka dag dag ah waxaa lagu yaqaana

a) Qariirada candhada oo bararta isla markaana kululaada oo xanuun daran keena
b) Neefka oo caanaha yareeya
c) Midabka caanaha oo biya noqda
d) Marka qaar ibta naasaha oo adkaata islamarkaana isku xiro dhiig xinjiro ah ama maal

- Qaabka aan dag dag ahey

Intabada waa adkaataa si loo garto astaamihiisa waxaa kaliyah oo kagu yaqaan

a) Finan yar yar ah oo kasoo baxa naasaha salkooda

5- **Daaweynta cudurkaan (Treatment)**

a) Cudurkaan waxaa lagu daaweyn karaa sulphonomides in lagu duro neefka qabo cudurkaan
b) Penicillin
c) Penethamate

6- **Kahor tag (Prevention)**

a) Cudurkaan waxaa looga hor tagaa in si dag dag ah neefka lagu arko isla markaas si dag dag ah loo daaweeyo

b) In laga hor tago wax walba oo naasha xoolaha dhaawac u keeni karo

c) In loogu danbeeysiiyo lismada ama maalida neefka lagu tuhmaayo cudurkaan si kuwa kale uusan ugu faafin cudurkaaan

d) In lagu dhaqo candhada iyo naasaha xoolaha biyo uu ku jiro (potassium choloride)



Muuqaalada nuuf lo'ah oo qaba cudurkaan galaha

## 17- Cagaarshe (Leptospirosis)

**1- Hordhac**

cudurkaan cagaarshaha waa cudur qaabkiisu jilicsanyahay ee faafa kaasoo waxyeeleeya ariga, lo'da idaha,doonfaarka, eeyaha iyo fardaha, wuxuu kaloo kudhacaa dadka waxaana lagu yaqaan xummad farabadan , culeyska jirka oo isdhima, beer xanuun iyo jirka xoolaha iyo dadka oo cagaarta mararka qaarna wuxuu u keena dhicis xoolaha riman

**2- waxaa keena cudurkaan (Aetiology)**

cudurkaan waxaa keena shan nuuc oo ka mid ah kabteeriyo cagaarshaha

a) leptospira pomana
b) leptospira hoyos
c) leptospira gripotyphosa
d) leptospira conicola
e) leptospira icero heamorrhial

bariga Afrika ama Somalia waxaa inta badan laga helaa nooca leptospira gripotyphosa

**3- habka uu u fido cudurkaan (Transmission)**

a) cudurkaan waxaa laga qaadaa kaadida neefka qaba hadii ay gaarto neef fiyoow
b) biyaha iyo cuntada ee bakteeriyadaan ay ku jirto waa laga qaadaa
c) waxaa kale oo keena qaniinyada shillinta

**4- Astaamaha cudurkaan (Symptoms)**

a) cudurkaan waxa uu ku soo muuqdaa 3-10 maalmood
b) heer kulka jirka oo gaara 41℃
c) hadii uu neefku irmanyahay caanihiisa oo adkaada mararka qaarna lagu arko dhiig xinjira ah oo caanaha la socda
d) dhiig la'aan dag dag ah oo neefka ku dhacda
e) beerka neefka oo aad u barara
f) maqaarka neefka ama qofka oo noqda sida midabka jaalaha

**5- daaweynta cudurkaan (Treatments)**

a) cudurkaan waxaa lagu daaweeya streptomycin oo lagu duro neefka penicillin
b) oxytetrecycilin

**6- kahor tag (Prevention)**

a. cudurkaan waxaa looga hor tagaa in laga saaro xerada neefka lagu arko cudurkaan
b. in la siiyo tallaal xoojin ah xoolaha uu ku dhici karo cudurkaan iyo (antibiotic) in lasiiyo si joogto ahna loo isticmaalo.

## 18- <u>Kiliya xanuun (Corynebacterium Infection)</u>

**1- Hordhaca**

xoolaha waxaana cudurkaan inta badan keena afar nooc oo kamid ah (corynebacterium) cudurkaan kaliya xanuunka waa cudur ay keento bakteeriyo kaas oo kudhaca dadka iyo oo kala ah

a) CB pyogenes
b) CB renale
c) CB pseudo-tuberclosis
d) CB equi

**2- Waxaa keena cudurkaan (Aetiology)**

Cudurkaan waxaa inta badan keena (coryne bacterium renale) taas kalliyaha dadka iyo xoolaha wax yeeleysa waxayna inta badan ku kortaa kaadida neefka ama qofkey ku dhacdo

**3- Habka uu ufido cudurkaan (Transmission)**

a) Cudurkaan waxa uu u fidikaraaa xayawaanka jiran kaadidiisa oo gaarta midka fiyoow
b) Xoolaha qaba cudurkaan ayaa saldhig u ah fidida cudurkaan
c) Waxaa kaloo laga qaadaa caannaha neefka qaba cudurkaan

**4- Astaamaha cudurkaan (Symptoms)**

a) Cudurkaan waxaa lagu yaqaan in neefka qabo cudurkaan kaadidiida uu soo raaco dhiig mararka qaarkood
b) Bog xanuun ku yimaada neefka
c) Kaliyaha iyo kaadi mareenka oo barara
d) Tabardarro dag dag ah iyo fuuq bax neefka ku yimaada
e) Caanaaha oo yaraada hadii u irmaanyahay neefku
f) Astaanta ugu weyn waa kaadida oo ay dhiig iyo maal ay soo raacdo

**5- Daaweynta cudurkaan (Treatment)**

a) Cudurkaan waxaa lagu daaweeyn karaa (penicillin) oo lagu duro neefka qaba
b) Procine penecilline G

**6- Kahor tag (Prevention)**

a) Cudurkaan waxaa looga hor tagaa in xerada xoolaha laga saaro neefka qaba si deg deg ah lana daaweeyo.
b) In la siiyo xoolaha xoojin ama tallaal si looga hortago cudurkaan

# 2. CUDURADA AY VIRUSKU KEENTO

## (Virus Disease)

### 1- Dabakaruub ama Agmar (Rinder pest)

1. **Hordhac**

   Cudurkaan dabakaruubka waa cudur uu keeno (virus) ee dag deg wax u gumaada ee aad u faafa ee ku dhaca lo'ginsiga iyo lo'da iyo kuwo kale iyo 8 nuuc oo xayawaanka duur joogta ah sida, gariga, baciidka, iyo kuwo kale, waxaana lagu yaqaana dhiig roor iyo nabarro yar yar oo ku dhaca xuubka jilicsan ee habdhiska dheef shiidka cudurkaan waxa uu kudhacaa xayawaanka 100% hadii uu soo galo deegaankaas, waxa uuna dilaaa 90%.

2. **Waxaa keena cudurkaan (Aetiology)**

   Cudurkaan waxaa keena virus loo yaqaano (pantropic virus) kaas oo baabi'iya xuubka jilicsan ee habdhiska dheef shiidka.

3. **Habka uu ufido cudurkaan (Transmission)**

   a) Cudurkaan fiditaankiisa waxaa saldhig u ah xayawaanka qaba cudurkaan oo taabta ama ku neefsada xayawaan kale oo uu ku dhici karo cudurkaan
   b) Biyaha iyo cuntada uu gaary jeerima cudurkaan keeno
   c) Cudurkaan waxaa kale ee uu raaca hawada iyo dabeysha socota
   d) Qaabka rimi gacmeedka way ku kala qaadaan xayawaanada

4. **Astaamaha cudurkaan (Symptoms)**

   a) Cudurkaan waxaa uu ku soo muuqdaa 6-8 maalmood
   b) Heerkula jirka xayawaanka oo gaara 40.5°C
   c) Xuubka jilicsan ee sanka, indha iyo afka oo dhiig roor yeesha aadna u guduuta
   d) Sanka oo diif fara badan ka yimaada
   e) Xayawaanka oo cuntada cuniwaaya
   f) Miir la'aan ku timaada xayawaanka
   g) Xayawaanka oo hooskiisa kacarara (photo phobia)

h) Labada xirribood ee indhaha oo aad u gaduuta islamarkaan barara



Waa muu qaalka neef qaba cudurkaan dabakaruubka

5. **Daaweyta cudurkaan iyo ka hortagiisa (Treatment and Prevention)**

a) Cudurkaan waxaa lagu daa weeya in lasiiyo xayawaanka qaba tallaal oo xoojin ah si wayawaanka difaaciisa kor loogu qaado
b) In laga talaaloo cudurkaan xoolaha dibada laga keenay gaar ahaan lo'da
c) In lasiiyo tallaal xoojin ah mar walba lo'da nuuca loo yaqaan (zebu cattale) sab-abtoo ah nuucaan waa nuuca ugu nugul cudurkaan nuucyada lo'da.

## 2. <u>Cabeeb (Foot And mouth Disease)</u>

**1- Hordhac**

Cudurkaan cabeebka waa cudur dhaqsi wax u dila ee faafa ee ku dhaca xaywaanada dab-joogta sida lo'da doofaarka, idaha, riyaha iyo xayawaanada kale ee duur joogta ah sida deerada, baciidka iyo dooliga cudurkaan waxaa kale ee uu ku dhacaa dadka, waxaana lagu yaqaanaa xummad fara badan oo ay daba joogto nabaro kasoo baxa xuubka jilicsan ee afka dhexdiisa iyo meesha ay iska galaan qoobabka xayawaanka iyo maqaarka.

**2- Waxaa keena cudurkaan (Aetiology)**

Cudurkaan waxaa keena (virus) aad u yar kaas oo u adkeeysta qaboowga iyo kuleylka wuxuuna u kalabaxaa 7-nuuc oo vurus ah.

a) O.A.C ( SAT 1, SAR 2, SART 3 ) gaar ahaan nuuca ( O.A , sat 1,iyo sat 2) wxay ka jiraan bariga afrika.
b) Nuuca C mararka qaar waxa uu kajiraa Kenya, Ethiopia, sudan.
c) Qeybaha soo hararna waxaa laga helaa aduunyada kale.

**3- Habka uu u fido cudurkaan (Transmission)**

a) Cudurkaan waxa uu ku fidaa in uu gaaaro xayawaanka fiyoow wax ka yimid xayawaanka jiran
b) Hadii meel ay iskugu tagaan xayawaan jiran iyo mid caafimaad qaba waa u kala gudbi karaa cudurkaan
c) Weelasha cuntada lagu cuno waa ku kala qaadaan xayawaanada
d) Waxyaabaha xayawaanka ka yimaada waa laga qaadaa sida hilibka iyo caa-naha

**4- Astaamaha cudrukaan (Symptoms)**

a) Cudurkaan waxaa lagu yaqaan in ay nabrro ka soo baxaan agagaarka afka iyo xuubka jilicsan ee gudaha afka
b) Dhareer iyo diif fara badan oo kayimaada sanka iyo afka neefka
c) xummad farabadan oo xayawaanka lagu arko
d) nabaro kasoo baxa halka ay iska galaan maqaarka iyo qoobka xayawaanka taas oo keenta in uu xayawaanka jiiso ama socon waayo

**5- daaweenta cudurkaaan iyo ka hortagiisa (Treatment and Prevention)**

a) cudurkaan malahan wax daawo ah oo u gaar ah balse xayawaanka lagu arko cudurkaan waxaa lagu sameeyaa sida soo socota

**b-** waa in lasiiyo xayawaaanka uu ku dhaco caws doog ah ama cagaaran iyo biyo nadiif ah isla markaana lagu xiraa meel hoos ama har leh

**c-** hadii cunto kale cunaayo waan in lasiiya cunto wax tar leh

**d-** in nabarada afka iyo lugaha looga dhaqo daawo jeeris dile ah lana siiyo xaya-waanka kaniini loo yaqaan (sulphadimidine)

**e-** in laga tallaalo xayawaanka cudurkaan aan qabin




Waa muuka neef lo' ah oo qaba cudurkaan cabeebka

## 3. <u>Carrab madoobaad ( Blue Tongue)</u>

1- **Hordhac**

Cudurkaan carrab madoobaadka waa cudur (virus) ah waxa uuna ka yimaadaaa qaniinyada cayayaanka yar yar waxa uuna ku dhacaa idaha ma-rarka qaar koodna lo,da iyo riyaha

2- **Waxaa keena cudurkaan (Aetiology)**

Cudurkaan waxaa keena (16- nuuc oo vurus) ah kaasoo wax yeeleeya idaha iyo lo'da in kastoo aan la cadeyn Karin nuuca gaar ahaan lo'da wax yeeleeya

3- **Habka uu u fido cudurkaan (Transmission)**

a) Cudurkaan wuxuu u fidaa xilliyada roobabka culus ay da'aan isagoo marka hore waxyeelo u geysta idaha kadibna idaha waxay qaadsiiyaan cudurkaan lo'da.

b) **Astaamaha cudurkaan (Symptoms)**

   a) Dhareer farabadan oo neefka ka yimaada
   b) Bushimaha ama faruuryaha neefka oo barara
   c) Sanka neefka oo diif ka yimaada
   d) Neefsashada oo ku adkaata neefka
   e) Mararka qaarkoodna lo'da uu cudurkaan ku dhaco waxaa lagu arkaa nabaro ka soobaxa carrabka, dhabxanaga iyo afka agagaarkiisa

4- **Daaweeynta iyo ka hor tagga cudurkaan (Treatment and Prevention)**

a) Cudurkaan ma laha daawo u gaar ah ee lagu daaweeyo balse wuxuu lee-yahay tallaal kaasoo xoolaha la tallaalo sanadkii hal mar gaar ahaan marka loo maleeynaayo in ay da'ayaan roobab waa weeyn sida xilliga gu'ga.

## 4. <u>Xummadda dooxada rifti (Rift Valley Fever)</u>

1. **Hordhac**

   Cudurkaan xummadda dooxada waa cudur deg deg wax u gumaada isla markaana faafa, waxa uu ku dhacaa xoolaha sida lo'da, ariga, idaha iyo geela islamarkaan waxaa kale uu ku dhacaa dadka kaas oo dadku iyo xooluhu isku gudbiyaan gaar ahaan waxa uu aad u dilaa ubadka yar yare e lo'da iyo idaha, kuwa waa weeyn waxa uu u keenaa dhicis.

2. **Waxaa keena cudurkaan (Aetiology)**

   Cudurkaan waxaa keena (bunya virus) bunyo fayriska waa bahda ay keento arthrobod-ka wana (RNA virus) kaasoo si baaxad leh isugu baheysata wax yeelada laf dhabareeyda uu ku dhaco

3. **Habka uu cudurkaan ufido (Transmission)**

   a. Cudurkan waxaa fidiya kaneecada oo u kala gudbisa xoolaha iyo dadka

   b. Cudurkaan waxa kale oo gudbiya kaneecada nuucyada loo yaqaan (Aedes and culex genera)

4. **Astaaaha cudurkaan (Symptoms)**

   a. Cudurkaan waxaa u xoolaha u qabtaa siyaabo badan marka uu ku dhaco waxa aanan kasoo qaadeynaa laba siyaabood oo kala ah marka uu deg deg yahay ( acute form) iyo marka uu yahey mid sahlan (mild form)

   b. Qaabka deg deg ah waxaa lagu yaqaan in uu dilo ubadka yar yare e lo'da iyo idaha markuu ku dhaco 95%

   c. Qaabka sahlan waxa uu ku dhacaa xoolaha waa weeyn waxaa kaliyah uu sababaa inta badan dhicis ama in ay soo ridaan xoolaha riman waxa uuna dilaa 20%

   d. Qaabka dadka uu ugu dhaco, dadka waxa uu ka abaara ama uga dhacaa habdhiska neefsashada inta badana waxa uu u keena kor xanuun, xummad farabadan, dhaqdhaqaaqa oo ku adkaada qofka,

neefsiga oo dhiba , cuntada uu qaadan waayo, kadibna sanka iyo afka oo dhiig kakeeno, waxaana raaca inta badan dhimasho.

5. **Daaweynta cudurkaan iyo kahor tagga (Treatment and Prevention)**
    a. Cudurkaan malaha daawo u gaar ah balse waxaa looga hortagaa in lagu buufiyo sun lagu laayo kaneecada lagana taxadarro in ay kaneecadu dhalato taas oo faafin karta cudurkaan.
    b. In lala dagaalamo lana baabi'iyo meel kasta oo ay ka imaan karto kaneecada nuuca aan kor ku soo sheegney, ee cudurkaan faafitaankiisa ka qeyb qaadankarto
    c. In lasiiyo tallal xoolaha oo laga hor tago cudurkaan



**book-gaan waxaa qoris iyo dib u habayn buuxda ku sameeyay Muhiadin Farah Gedi (mfg) oo ahaa ardayda wax kabartay jaamacadda ummadda soomaaliyeed gaar ahaan kuliyada caafimadka xoolaha. (Bachkii 3aad)**

## 5. Waaf-gaanbada lo'da (Lumpy Skin Disease)

1. **Hordhac**

   Cudurkaan waaf-gaanbada lo'da waa cudur uu keeno (vurus) ee ku dhaca lo'da waxaa lagu yaqaan nabarro kasoo baxa dhamaan jirka oo dhan,

2. **Waxa keena cudurkan (Aetiology)**

Cudurkaan waxaa keena viruska kaasoo kala ah

   a. Nuuca (allerton)
   b. Iyo nuuca (Neathling) waxaana laxaqiijiyay in uu kudhaco inta badan africada bari.

3. **Habka uu u fido cudurkaan (Transmission)**

   a. Cudurkaan asal ahaan lama yaqaan qaabka uu u fido balse waxaa laga yaabaa in ay masuul katahay faafida cudurkaan kaneecada.
   b. Waxaa kaloo laga qaadaa cudurkaan hadii xayawaan qaba iyo mid fiyoow meel layskugu geeyo oo ay isla baryaan.
   c. Cudurkaan waxa uu fidaa inta badan xiliyada ay roobabku jiraan

4. **Astaamaha cudurkaan (Symptoms)**

   a. Cudurkaan waxaa astaan u ah nabarro kasoo baxa dhammaan jirka oo dhan
   b. Dhareer iyo diif ka yimaada sanka iyo afka isla markaana ay guduutaan indhaha neefka
   c. Heerkuka jirka oo gaara 40-41℃
   d. Jirka neefka oo cuncunna, nabarro ay kasoo baxaan dhamaan jirka oo dhan
   e. Ubadka yar yar ee lo'da oo mararka qaarkood shubma
   f. Nabarada mararka qaar kood waxaa laga helaa carrabka iyo afka dhexdiisa.

5. **Daaweynta cudurkaan iyo kahor tagga (Treatment and Prevention)**

   a. Cudurkaan malaha daawo gaar ah isla markaana way adagtahay sida looga hortago balse waxaa lasameyn karaa labadaan arimood

b. In laga tallaalo lo'da cudrkaan da'kasta oo ay jirto meela looga baqayo in uu cudurkaan ka dillaaco
c. Iyo in loogu diyaariyo lo'da sheeybaarada xoolaha LSD kaas oo looga hortagi karo cudurkaan.

## 6- <u>Furuqa lo'da (Cowpox)</u>

**1- Hordhac**

Cudurkaan furuqa lo'da waa cudur uu keeno (virus) ee ku dhaca dadka iyo xoolaha laguna kalaqaado is taabasho waxaana lagu yaqaan dhibco kuus kuusan oo nabarro ah oo kasoo baxa candhada xoolaha naasahooda.

**2- Waxaa keena cudurkaan (Aetiology)**

Cudurkaan waxaa keena virus loo yaqaan (pox virus) nabarrada uu keenana waxey lamid yihiin (pox officinale) viruska loo yaqaan wuxuuna leeyahay qaabka leydiga

**3- Habka uu ufido cudurkaan (Transmission)**

a) Cudurkaan waxaa fidiya ama u kala gudbiya dadka xoolaha maala gacmahooda
b) Waxaa kaloo gudbiya qaniinyada cayayaanka
c) Istaabashada xayawaanka jiran iyo kan fiyoow way ku kala qaadaan

**4- Astaamaha cudurkaan (Symptoms)**

a) Cudurkaan waxuu kusoo muuqdaa 2-7 maalmood
b) Waxaa kaloo cudurkaan lagu gartaa in nabarro kasoo baxaan candhada iyo naasaha neefka
c) Barar candhada iyo naasaha neefka xira
d) Mararka qaar koodna naasaha oo dilaaca
e) Naasaha iyo candhada oo yeesha midabka huruuda

**5- Daaweynta iyo kahortagga cudurkaan (Treatment and Prevention)**

a) Cudurkaaan malaha daawo u gaar ah balse waxaa la isticmaalaa inta badan daawo burcad ah ee jeermis dila ah oo laga mariyo neefka naasaha iyo candhada
b) Iyo in la cirib tiro cayayaanka keena cudurkaan.

## 7- Raabiyo ( Rabies Virus)

**1- Hordhac**

Cudurkaan raabiyada waa cudur deg deg wax u dila ee ku dhaca xoolaha iyo dadka xubnahooda dareenka, gaar ahaan xayaanada dhiiga diirran leh, wuxuuna ku yimaadaa qaniinyada xayawaan qaba cudurkaan oo qanniina xayawaan kale ama xayawaan qaba oo qanniina dadka, waxaana aad ugu nugul cudurkaan xayawaanka hilibka cuna (carnivorous animals) waxaana lagu yaqaan deggenaasho la'aan ku timaada neefka iyo dhamaan dareenka maskaxda oo dhuma.

**2- Waxa keena cudurkaan (Aetiology)**

Cudurkaan waxaa keena (neurotorobic virus) kaasoo inta badan ku jira dareenka neefka cudurkaan qaba.

**3- Habka uu u fido cudrkaan (Transmission)**

a) Cudurkaan waxa uu ku yimaadaa xayawaanka qaba cudurkaan oo qanniina xayawaan caafimaad qaba

b) Nabarrada jirka xayawaanka ku yaala uu gaaro dhareerka xayawaanka qaba

**4- Astaamaha cudurkaan ( Symptoms)**

A) Cudurkaa wuxuu u soo muuqdaa labo siyaabood oo kala ah sida soo socota.

B) Marka uu deg degga yahay waxa uu ku soo muuqdaa 7-30 maalmood

C) Inta badan cudurkaan waxa lagu yaqaan in uu ku soo muuqdo 15-180 maalmood

D) Lugaha danbe oo uu neefku dhaqaajin waayo

E) Dhareer farabadan oo ka yimaada neefka

F) Iyo dareenka maqaarka oo kataga neefka

G) Guud ahaan dhaqdhaqaaqa uu gabo neefku

H) Heer kulka jirka oo mararka qaar gaara 42.5°C

**5- Daaweeynta iyo kahortaga cudurkaan ( Treatment and Prevention)**

a) Neefka uu ku dhacay cudurkaan raabiyada in laga saaro xoolaha

b) In lagu dhayo daawo jeermis dile ah neefka meelaha nabarrada qanniinyada ku yaaliin

c) Mararka qaar koodna waxaa la isticmaali karaa cadad farabadan oo (antibiotics) ah sida penicillin

d) In laga tallaalo xoolaha 10-biloodba hal mar cudurkaaan

e) In lasiiyo dadka talaalka cudurkaan

f) In la laayo ama la sumeeyo eeyaha duur-joogta ah iyo xayawaanada kale ee hilib cunka ah sida dawacada iwm.

## 8- Jabtada lo'da (Epivaginitis)

**1- Hordhac**

Cudurkaan jabtada lo'da waa cudur keena dhalmo la'aan waxaana lagu kala qaadaa isku tagga labka iyo dhadiga lo'da waxaana astaan u ah malax katimaada xubnaha taranka ee labka iyo dhadiga iyo xiniinyaha labka oo barara, wuxuuna sababaa dhalmo la'aan ku timaada lo'da

**2- Waxaa keena cudurkaan (Aetiology)**

Cudurkaan waxaa shaki ku jirin in uu keeno virus

**3- Habka uu u fido cudurkaan (Transmission)**

a) Cudurkaan waxaa lagu kala qaadaa isku tagga labka iyo dhadiga oo uu midkood qabo cudurkaan
b) Xayawaanka qaba iyo kan fiyoow oo hal xero iskula jirana siyaabo kala duwan ayey ku kalaqaadaan
c) Cudurkaan waxaa kale ee ay xooluhu ku kala qaadaan qalabka xoolaha loo adeegsado

**4- Astaamaha cudurkaan (Sypmtoms)**

a) Cudurkaan waxa uu ku soo muuqdaa maalmo yar
b) Cudurkaan waxa lagu yaqaan dheecaan ama malax ka timmda xubnaha taranka ee labka iyo dhadigga
c) Iyo saynta lo,da oo bararta iyo agagaarka xubinta taranka dhadig (vagina) ay kasoo baxaan nabarro
d) Xanniinyaha dibida oo barar
e) Iyo shahwada dibida oo is badal ku dhaco midabkeeda

**5- Daaweeynta iyo ka hortagga cudurkaan ( Treatment and Prevention)**

a) Cudurkaan waxaa lagu daaweeya in duleelka xubinta taranka (vaginal opening) lagu dhaqo (potassium permanganate)
b) In shahwada loo is ticmaato rimay gacmeedka laga qaato dibi caafimaa koodu wanaagsanyahay
c) In aad looga foojignaado in uu xerada soo galo dibi cudurkaan qaba

## 9- Joogo ama joogtooy (Three Days Sickness)

**1- Hordhac**

Cudurkaan joogo ama joogtooy waa cudur uu keeno (virus) oo aan istaa-basho lagu kala qaadin ee ku dhaca lo'da waxaana lagu yaqaan xummad fara badan neefka ku timaada, iyo neefka oo dhaqdhaqaai waaya iyo isagoo jiisnimo deg deg ah lagu arko

**2- Waxaa keena cudurkaan (Aetiology)**

Cudurkaan waxaa keena virus inta badan laga helo dhiigga dhexdiisa waxaa uuna ka dhacaa dalalka afrikda koonfureed iyo bartamaha iyo bariga qaarada afrika

**3- Habka uu u fido cudurkaan (Transmission)**

a) Cudurkaan waxaa uu ku fidaa ama keena sida la rumeysan yahay qanni-inyada cayayaanka yar yar

**4- astaamaha cudurkaan (Symptoms)**

a) Cudurkaan waxaa astaan u ah yaduun deg degga ah oo neefka ku timaada
b) Keer kulka jirka neefka oo kaca gaarna 41℃
c) 1-4 maalmood oo uu neefka dhaqdhaqaaqi waayo
d) Neefka oo haraahir fara badan lagu arko
e) Murqaha lugaha oo dhaqdhaqaaqi waaya iyo jiisnimo ku timaada lugaha danbe ee neefka

**5- Daaweynta iyo ka hortagga cudurkaan (Treatment and Prevention)**

a) Cudurkaan malaha daawo u gaar ah balse waxaa looga hor tagi karaa in lagu sameeyo xoolaha tallaal xoojin ah si cudurkaan uu isaga difaaco
b) In neefka marka uu ku dhaco la geeyo meel hoos leh

## 3- Cudurada ay keento Ricketsia

**Rickettsia**

### 1. <u>Wadna- biyood (Heart Water Disease)</u>

1. **Hordhac**
   Cudurkaan wadna-biyoodka waa cudur aad wax u dila ay keento shillinta nooc ka mid ah wuxuuna ku dhacaa lo'da, idaha iyo riyaha waxaaana lagu yaqaan xummad aad u daran iyo degenaansho la'aan ku timaada neefka, wuxuuna ka dhacaa koonfurta, bartamaha iyo bariga afrika iyo dhamaan dalalka kulaalayaasha
2. **Waxaa keena cudurkaan (Aetiology)**
   Cudurkaan waxaa keena (cowdria ruminantium) taasoo gasha RBC
3. **Habka uu u fido cudurkaan (Transmission)**
   a. Cudurkaan waxaa fidiya 3-nuuc oo shillinta jinsiga loo yaqaan (Ambyloma)
   b. **Ambyloma hebaium**
   c. **Ambyloma variagatum**
   d. **Ambyloma gemma iyo pomposums**



**Waa muuqaalka shillinta loo yaqaano (Ambyloma)**

4. **Astaamaha cudurkaan (Symptoms)**
   a. Cudurkaan waxuu ku soo muuqdaa 5-16 maalmood wuxuuna u qabta neefka 3-nuuc oo kala ah
   b. Qaab deg deg ah
   c. Qaab jilicsan
   d. Qaab gaabis ah

Waxaana soo qaadeynaa astaamaha guud ee cudurkaan

   a. Xummad gaarta 41-42℃
   b. Astaamo degenaansho la'aan ah oo ku timaada neefka
   c. Neefka oo sameeya miciyada in uu isku xogo ama jiririqsi
   d. Shuban mararka qaarkood ku yimaada neefka

5. **Daaweynta cudurkaan (Treatment)**
   a. Cudurkaan waxaa lagu daaweeyaa (oxytetrcyclin) oo lagu durro neefka
   b. Sulphadimidine
   c. Chloro-tetrcyclin



Waa muuqaalka neef uu ku dhacay cudurkaan wadna-biyoodka

6. **Ka hortagga cudurkaan (Prevention)**

   a) Cudurkaan waxaa looga hortagaa in la baabi'iyo meelaha shil-linta ka imaan karto ee cudurkaan sababta
   b) In xoolaha lagu dhayo suntan shillinta 3-7dii maalmood hal mar
   c) In la siiyo tallaal xoojin ah xayawaanka yar yare e cudurkaan uu ku dhaco.

## 2. Mimbarar ama yibir (Q. fever)

**1- Hordhac**

Cudurkaan minbararka ama yibirka waaa cudur ku dhaca xoolaha iyo dadkaba wuxuuna keena marka uu dadka ku dhaco qunfac iyo xummad fara badan xoolaha wuxuu u keena mandheerta oo bararta iyo xoolaha riman oo dhiciya

**2- Waxaa keena cudurkaan (Aetiology)**

Cudurkaan waxaa keena shillinta loo yaqaan (coxiella burnetii) waana nooca siidaaya suntan sababta xummada dadka iyo xoolaha

**3- Habka uu u fido cudurkaan (Transmission)**

a) Cudurkaan waxaa fidiya nooca shillinta ee aan kor ku soo sheegnay taasoo soo qaadda jeermiga neefka jiran kadibna u gudbisa neefka fayoow



**book-gaan waxaa qoris iyo dib u habayn buuxda ku sameeyay Muhiadin Farah Gedi (mfg) oo ahaa ardayda wax kabartay jaamacadda ummadda soomaaliyeed gaar ahaan kuliyada caafimadka xoo-laha. (Bachkii 3aad)**

## 4- Cudurada protozoa-da ay keenaan

**(Protozoa Disease)**

**1. <u>Surrada (surra T.evansi)</u>**

**1- Hordhac**

Cudurkaan surrada waa cudur ku dhaca xayawaanada waa weyn sida geela iyo maroodiga waxaana keena tixsiga (glossinaha) nuucyadiisa qaar kamid ah iyo nuucyada kale oo looyaqan (antennae iyo tapanus)

**2- Waxaa keena cudurkaan (Aetiology)**

Cudurkaan surrada waxaa keena (tixsiga glossinaha) qaar kamid ah iyo 2 nuuc oo kale oo tixsi ah oo loo yaqaan (antennae iyo tapanus)

**3- Habka uu u fido cudurkaan (Transmission)**


a) Cudurkaan waxaa fidiyo glossinaha iyo 2-nuuc kale ee aan kor ku soo sheegney

**4- Astaamaha cudurkaan (Symptoms)**

Cudurkaan gosha ee surrada waxaa astaan u ah marka uu geela ku dhaco

a) Culeyska neefka oo is dhima
b) Dhogorta neefka oo taag taag noqota
c) Qanjirada neefka oo barara geela ah
d) Neefka oo indhaha ka ilmeeya
e) Kaadida neefka geela oo yaraata isla markaan noqota mid aan laheyn urkii lagu yaqaaney
f) Neefka oo caanaha yareeya isla markaana dhiig la,aan ku dhacda

g) Neefka oo caato noqda



Neef geelaha oo qaba cudurkaan surrada

**5- Daaweynta cudurkaan (Treatment)**

Cudurkaan gosha surrada waxaa lagu daaweeyaa

a) Antrycide prosult oo lagu duro neefka geela
b) Prima quine
c) Tryquine

**6- Ka hor tag (Prevention)**

a) Cudurkaan waxa looga hor tagaa in aaan geela loo daaqsin geeyn meelaha lagu tuhmaayo in uu ka jiro tixsiga dhaliya cudurkaan
b) In laga saaaro meelaha howdka ah ee ay ka dhashaan marka roobka da,o (antennae iyo tapanus) gaar ahaan roobka marka uu da'o 9-maalomood kadib lana geeyo geela meel aan hawd laheyn
c) In la buufiyo meelaha lagu tuhmaayo in uu tixsigaan ka dhalan karo



**book-gaan waxaa qoris iyo dib u habayn buuxda ku sameeyay Muhiadin Farah Gedi (mfg) oo ahaa ardayda wax kabartay jaamacadda ummadda soomaaliyeed gaar ahaan kuliyada caafimadka xoolaha. (Bachkii 3aad)**

## 2. Gosha fardaha iyo dameeraha (Dorine, T. E quiperdum)

**1- Hordhac**

Cudurkaan gosha fardaha iyo dameeraha (dorine) waa cudur ku dhaca hal qoobleyda (Animal having single hoove) wuxuuna ka dhacaa adunyada oo dhan

**2- Waxa keena cudurkaan (Aetiology)**

Cudurkaan waxaa keena qeyb ka mid ah golossinaha waxaana loo yaqaan (T.Equiperdum)

**3- Habka uu u fido cudurkaan (Transmission)**

a) Cudurkaan waxaa uu u fidaa labka iyo dhadiga oo isku taga by coitus
b) Waxaa kaloo fidiya qalabka loo is ticmaalo xoolaha sida cirbadaha wax lagu duro iwm.

**4- Astaamaha cudurkaan (Symptoms)**

a) Cudurkaan waxaa astaan u ah halqoob leeyda oo xaniinyaha ka barara
b) Neefka oo cuntada cuni waaya
c) Dheecan ka yimaada xubnaha taranka ee dhadiga iyo labka

**5- Daaweynta iyo ka hortaga cudurkaan (Treatment and Prevention)**

a) Cudurkaan waxaa lagu daaweeyaa iyadoo lagu duro neefka daawada loo yaqaan (daminazine)
b) Bernil
c) In fardaha iyo dameeraha laga illaaliyo meelaha uu ka dhalan karo tixsiga keena cudurkaan.

### 3. <u>Uur dhiig (Coccidiossis)</u>

**1- Hordhac**

Cudurkaan uur dhiiga waa cudur deg deg ugu dhaca xoolaha iyo digaaga mararka qaarna qaaata  waqti dheer waxa uun keena shuban dhiig la socdo waxa uuna dhacaa xilliyada kuleylka ah ee ay dabeeyluhuna jiraan

**2- Waxa keena cudurkaan (Aetiology)**

Cudurkaan waxaa keena 10-nuuc oo (coccidian) ah balse waxaa dhibaatada ugu badan geysta 2-nuuc oo kamid ah (Eimeria Zurnii iyo Eimeria bovis)

**3- Habka uu u fido cudurkaan (Transmission)**

a) Cudurkaan wuxuu u fidaa xayawaanka qaba saxaradiisa ayuu soo raaca jeeermiska kadibna waxaa cuno mid fiyoow sheygii jeermiska lahaa sida cuntada iyo biyaha iwm, sidaas ayuuna u fidaa cudurkaan.

**4- Astaamaha cudurkaan (Symptoms)**

a) Cudurkaan wuxuu ku soo muuqdaa 7-21maalmood
b) Shuban fara badan oo uu lasocdo wax yar oo dhiig ah marka uu cudurkaan bilow yahay
c) Wuxuu keena dhiig fara badan oo la socda saxarada marka uu gaaro 20-maalmood
d) Xoolaha ama digaaga oo ay ku dhaco tabar daro iyo dhiig la,aan deg deg ah

**5- Daaweynta cudurkaan (Treatment)**

a) Cudurkaan waxaa lagu Daaweeyn karaa in afka laga siiyo neefka (sulphadimidine)
b) Sulpha methazine
c) In la siiyo daawooyin burutiin ah  si neefka oo u soo noqoto awooda jirkiisa

**6- Ka hortagga cudurkaan (Prevention)**

a) Cudurkaan waxaa looga hortagaa in cuntada iyo biyaha loogu daro xoolaha (sulphadimidine) si cudurkaan looga hortaa

## 4 Gagab (East Coast Fever, Theilariosis)

**1- Hordhac**

Cudurkaaan gagabka  waa cudur ku dhaca lo'da iyo idaha, wuxuuna ka dhcaa qaarada Africa gaar ahaan, bariga afria sida sudan ,Somalia iyo Kenya iyo kuwo kale wuxuuna keena dhimasho deg deg ah

**2- Waxaa keena cudurkaa (Aetiology)**

Cudurkaan waxaa keena (T. parva) kaasoo ku yimaada qaniinyada shillinta nuuca loo yaqaan (Rhipice phallus appendiculatus) taasoo ka qaada neefka jiran jeermiga una gudbisa neefka fiyoow

3- **Habka uu u fido cudurkaan** (**Transmission**)

a) Cudurkaan waxa uu ka yimaadaa ama fidiya qaniinyada shillinta loo yaqaan (Rhipice phallus appendiculatus)

**4- Astaamaha cudurkaan (Symptoms)**

a) Cudurkaan waxa uu neefka u qabtaa labadaan, balse waxaan soo qaadaneynaa qaabka guud ee uu xoolaha u qabto oo ay ugu horeyso qanjirda neefka oo barara
b) Heer kulka jirka oo gaara 41℃
c) Caanaha neefka oo hoos u dhaco haduu irmaanyahay
d) Neefka oo indhaha ka ilmeeya isla markaana diif farabdan  ka yimaado sankiisa
e) Xuubka wareega indhaha oo barara iyo araga neefka oo noqda aragti humaag ah

**5- Daaweynta cudurkaan (Treatment )**

a) Cudurkaan waxaa lagu daaweeyaa (pamaquin)
b) Primaquin
c) Oxytetrcyclin

**6- Ka hortagga cudurkaan (Prevention)**

a) Cudurkaan waxaa looga hortagaa iyadoo logu buufiyo (coper sulphate) meelaha xoolahu daaqa ay u tagaan si shillintaan ay uga dhalan

b) In xoolaha lagu dhayo suntan shillinta 3-7dii maalmood hal ma

## 5. Kaadi dhiig (Bovine Babesiasis)

**1- Hordhac**

Cudurkaan kaadi dhiiga waa cudur deg deg ah xoolaha ugu dhaco ee aan taabasho lagu kala qaadin waxaaana keena (babesia) waxaana gudbiya shil-linta waxaana lagu yaqaana isagoo baabi'iya qeybta cas ee dhiiga taasoo keenta dhiig la'aan deg deg ah

**2- Waxa keena cudurkaan (Aetiology)**

Cudurkaan waxaa keena noole looyaqaan (babesia bigemina) taasoo la ru-meysanyahay inta badan in uu ka dhaco bariga afrika gaar ahaan soomaliya

**3- Habka uu u fido cudurkaan (Transmission)**

a) Cudurkaan waxaa fidiya nuucyada shilinta ee laga helo bariga Africa gaar ahaan soomaliya ee loo yaqaan (boophilus decolratus)
b) Rhipicephalus apendiculatus
c) Rhipicephalus exerts evertsi

**4- Astaamaha cudurkaan (Symptoms)**

a) Cudur kaan waxa uu ku soo muuqdaa 8-15maalmood
b) Heer kulka jirka oo gaara 42℃
c) Dhareer farabadan oo neefka afkiisa kayimaada
d) Culeyska neefka oo isdhima iyo dhiig la'aan deg deg ah
e) Neefka oo haraahira
f) Dhiiga gaduudan oo neefka kabaaba'o kadibna dhiigiisa oo isku badalo dhiig biyo biyo ah

**5- Daaweyta cudurkaan (Treatment)**

a) Cudurkaan waxaa lagu daaaweeyaa daawada loo yaqaan (Acaprin)
b) Bernil oo looga duro murqaha

**6- Ka hor tag (Prevention)**

a) Cudurkaan waxaa looga hor tagaa in lagu buufiyo (cooper sulphate) meelaha xooluhu daaaqsadaan
b) In xoolaha lagu dhayo suntan shillinta 3-7dii maalmood halmar

## 6. <u>Baal ama muqlay (anaplasmosis)</u>

**1- Hordhac**

Cudurkaan baalka waa cudur ku dhaca lo'da, ariga iyo idahaba waxaana keena qaniinyada shillinta iyo tixsiga waxuuna kadhacaa bariga afrika gaar ahaan soomaaliya wuxuuna keenaa xummad fara badan iyo dhiig la'aan

**2- Waxa keena cudurkaan (Aetiology)**

Cudurkaan waxaa keena noolayaal dhiiga gala oo kale ah (anaplasma marginale iyo anaplasma cenrale) waxaana mararka qaar lagu doodaa in anoplasmaha uusan ka tirsaneeyn cudurda protozoa-ha ee uu yahay virus balse inta badan waxaa la raaciyaa protozoa-da

**3- Habka uu u fido cudurkaan (Transmission )**

Cudurkaan waxaa keena ama u kala gudbiya xayawaanka qaniinyada shillinta nuuc ka mid ah iyo tixsiga

**4- Astaamaha cudurkaan (Symptoms)**

a) Cudurkaan wuxuu ku soo muuqdaa 10-20 maalmood marka qaar koodna waxuu ku soo muuqdaa ilaa 60-maalmood

b) Heer kulka jirka oo gaara 41°C gaar ahaan lo'da yar yar

c) Culeyska neeka oo is dhima

d) Dhiig la'aan deg deg ah oo ku timaada neefka

**5-Daaweynta cudurkan (Treatment)**

a) Cudurkaan waxaa lagu daaweeyaa daawada loo yaqaan (tetrymcin) oo lagu duro neefka

b) Benzoxazolyl

c) Biyo sonkor leh (glucose) oo lasiiyo neefka si awooda ay u soo noqoto

6-**Ka hor tag (Prevention**)

a) Cudurkaan waxaa looya hor tagaa iyadoo labaabi'iyo meel kasta oo ay imaan karto shillinta keena cudurkaan

b) In la isticmaalo (antibiontics) xilliga ay xummadda faraha badan jirto

c) In la isticmaalo tallaaka (anaplasmada) sanad walba

## 5- Cudurada ay keenaan funguska.

## Fungus Disease

### 1. Canbaar ama goosi (Ringiworm)

**1. Hordhac**

Cudurkaan cambaarta waa cudur jilicsan ee inta badan ku dhaca maqarka xoolaha iyo dadka waxaana keena (fungus) bahda looyaqana (trichophyton) waxaana astaan u ah nabaro koox koox ah oo ka soo baxa meelo ka mid ah maqarka xoolaha iyo dadka kuwasoo keena dheecan

**2. Waxa keena cudurkaan (Aetiology)**

Cudurkaan canbaarta waxa keena 3-nooca oo ka mid ah bahda (trichophyton) kuwaasoo kada ah

a. T. Vercosum
b. T. Shoeleini
c. T. Mentrophytus

**3. Habka uu u fido cudurkaan (Transmission)**

a. Cudurkaan inta badan waxaa gudbiya (T.vercosum) waxa uuna u kala gudbiyaa xoolaha jiran iyo kuwa fayow qaab is taabasho oo kali ah
b. Cudurkaan waxaa kaloo lagu kala qaada ayaado la isticmaalo qalab uu gaaray wax ka yimid nef jirran

**d. Astaamaha cudurkaan (Sympoms)**

a. Cudurkaan waxaa astaan u ah nabarro koox koox ah oo kasoo baxa maqaarka dadka iyo xoolaha meelo ka mid ah
b. Hadi nabarradaas la baaro waxa laga helaa inta badan (bacteria iyo funguska) aan kor ku soo sheegnay.
c. Waxa kaloo astaan u ah cudurkaan in haday nabarrada ka soo baxaan meel tin ku taal ay tintaasi soo ruqdo oo meeshi noqoto bar cad oo dhaawacii ka muuqdo

4. **Daweynta cudurkaan (Treatment)**
   a. Cudurkaan waxa lagu daaweeya daawada loo yaqaan (Acetylphridinuin bromide) oo ay ku jirto 10% (Alcohol ) oo dareera ah
   b. Thiabendizole 2-4% oo burcad ah in la mariyo jirka xoolaha ama dadka
   c. In lagu duro daawada loo yaqan (ivomectin 1ml/50kg) iyaado loo qiyaa-saayo culeyska jirka gaar ahaan xoolaha o kali ah

## 2- Cadho ( Bovine Cutaneous Streptoricosis)

1. **Hordhac**

   Cudurkaan cadhada waa cudur ku dhaca maaqaarka xoolaha iyo dadka waxaana keena (fungus) waxaa lagu yaqaan nabrro cun cun badan leh oo kasoo baxa dhamaan jirka oo dhan marka laxogana keena dheecaan biyo ah, mararka qaar kodna dhiig afkooda kayimaada nabaradaasi

2. **Waxa keen cudurkaan (Aetiology)**

   Cudurkaan waxaa keena (fungus) loo yaqaan (dermatophilus congulensis)

3. **Habka uu ku fido cudurkaan (transmission)**

   Cudrukaan waxaa gudbiya labo nuuc oo kale ah

   a) Qaniinyada shillinta nuuca looyaqaan (ambyloma)

   b) Iyo qaniinyada tixsiga loo yaqaan tixsi guri (house fly)

4. **Astaamaha cudurkaan (symptoms)**

   a) Cudurkaaan waxaa astaan u ah nabarro laga helo jirka gaar ahaan qoorta, madaxa , lugaha ,dhabarka,xoolaha iyo dadka

   b) Nabarrada marka hore waxey ku biloowdaan si yar marka danbana waxy ku fidaan jirka oo dhan

   c) Waxaa kaloo astaan u ah in xoolaha 5% oo ku dhaco cudurkaan laga helo isbadal ku dhaca maqaar kooda iyo dhogorta neefka oo xumaata

   d) Waxaa kaloo laga helaa meesha uu cudurkaan kadhaco shillinata nuuca keenta cudurkaan

5. **Daawooyinka cudurkaan (treatment)**

   a) Cudurkaan waxaa lagu daaweeya ( pencillin75000I.U per/kg m oo penicillin ah) oo lagu daraayo ( streptomycin) 75-ugm/kg ee qiyaasta culeyska jirka

   b) Waxaa kale oo la isticmaale karaa ( alcohol) oo lamariyo nabarrada jirka

   c) Ivomictin 1m1/50kg ee qiyaasaayo culeyska jirka oo xoolaha kaliya loo siticmaalo

6. **Cudurada ay keenaan dulin gudeedku**

**Endoparasites (Diseases Caused by worms)**

Gooryaanka waa daris kunoole gala caloosha xoolaha iyo dadka kaasoo u geysta dhibaato farabadan guud ahaana waxa uu u kala baxaa sadex nuuc oo kala ah

**1- (Round worms) gooryaanka goobada qaabkeeda leh**

**2- (Flukes) gooryaanka aan maraariyaha laheyn**

**3- (tape worms) gooryaanka marariyaha leh**

Waxayna galaan inta badan hab dhiysada sida neef sashada, qashinsaarka iyo taranka, dhiigwareega iyo habdhiska dareenka, waxaa kale oo ay galaan gooryaanadaan marka meertada noloshooda dhameystiranto habdhisyada sida dheefshiidka inta badan, waxeyna keenaan dhibaatooyin ay kamid yihiin, shuban, dhiig la'aan, cuntada oo ay qaadan waayaan dadka iyo xoolahaba, waxeyna ku dhacan intabdan dadka iyo xoolaha kunool daladka kulaalayaasha, waxaa kaloo laga helaa aduunyada inteeda kale.

Marka aan fiirino wax yeelada gooryaanka waxaa uu ubadan yahay ubadka yare e xoolaha iyo dadka kaasoo sababa dhiig la'aan deg deg ah, nafaqo daro ku dhacda ubadka xoolaha iyo dadka.

Gooryaankaan dhibaatadiisu waxey ubadantahay marka uu kujiro meertada noloshiisa, mararka qaarna waxaa uu dhibaadada geystaa marka noloshiisa dhameystiranto, waxaa ku faah faahindoona qeybaha soo socda, taasoo aan uga hadli doono qeybaha geysta wax yeelada marka ay meertada noloshooda ku jiraan iyo kuwa dhibaatada geysta marka ay noloshoodu dhameystiranto iyo meelaha ay kagalaan xoolaha iyo dadka


## 1) ROUND WORM

Round wormka waxaa laga helaa habdhiska dheefshiidka xoolaha iyo dadka iyo xubno kale, inta badan wuxuu ka dhacaa dalalka kulaalayaasha waxanna inta badan ugu dhibaata badan round wormka 2-noocoo kala ah;

=STRONGYLE

=SCARIDS

1-Nooca ugu horeeya (**strongylka**) wuxuu galaa caloosha iyo xiidmaha ama mindhiciraha 4-calooleyda waxaana lagu arki karaa indhaha caadiga ah ayadoo aan la isticmaalin weyneeso waxaa kale uu gala xiidmaha ama mindhiciraha waaweyn ee ubadka yar yar ee lo`da, doofaarka iyo digaaga, waxaana inta badan dhibaatada geeysta dhadigga marka uu gala xawayaanka ama dadka calooshooda, wuxuu dhalaa ukumo farabadan oo soo raaca saxarada xoolaha iyo dadka marka eey hesho hawo iyo kuleyl ama qoyaan ukunta wey qaraxdaa oo waxay diyaar u tahay haddii uu dad ama xoolo oo ay gaarto ukuntaasi isla markiiba shaqadeeda ay halka ka sii wadataa, sidaas ayeyna ugeystaan waxyeelada.



Waa muu qaalka gooryaaanka loo yaqaano (Round wormska)



**book-gaan waxaa qoris iyo dib u habayn buuxda ku sameeyay Muhiadin Farah Gedi (mfg) oo ahaa ardayda wax kabartay jaamacadda ummadda soomaaliyeed gaar ahaan kuliyada caafimadka xoolaha. (Bachkii 3aad)**

2-Gooryaanka **ascriku** waxa uu ku tarmaa saxarada dhexdeeda ciidda markeey gaarto ee neefka uu dhigo, isla markaana ukuntiisa markeey dillaacdo waxaa ka soo baxa noole yar loo yaqaan (LARVAE) kaasoo geeysta dhibaatada ugu badan ee nooca (ASCARISKA) waxaana uu u adkeesan karaa kuleylka iyo qaboowga , isagoo sameysta difaaca (EGG-SHELL) bilo ama sanado kale noolaan kara si uu usugto xawayaan kale

**3-Habka uu ufido cudurkan (Transmission)**

a) cudurkan waxuu u fidaa ukunta uu xaaray neefka jiran oo gaarta biyaha ama calafka kale ee xoolaha, kadibna cuno xayawaanka caafimaadka qaba sidaas ayuuna ufaafa cudurka gooryaankaan

**4-Astaamaha cudurkaan(Symptoms)**

a) Cudurkaan waxaa astaan u ah shuban deg deg ah oo neefka ku timaadda.
b) Culeyska jirka neefka oo is dhima
c) Dhiig la'aan deg deg ah oo ku timaadda neefka
d) Saxarada neefka oo aad u urta
e) Neefka oo caasha ka barara
f) Ugu danbeyntii neefka wuxuu noqdaa caato daran

**5-Daaweynta cudurkan (Treatment)**

a) Cudurkaan waxaa lagu daaweyn karaa daawada sida phenothiozine
b) Carbon tetrachlored
c) Piperzine

## 2. (**FLUKES**)

1- (flukeska) ama gooryaanka beerka gala, waa gooryaanka inta badan dhibaatadiisa ka dhacdo dalalka kulaalyaasha, wuxxuunna ku dhacaa xawaayanada dab jooga oo dhan iyo digaagga, wuxuuna sameeya labo weji ee meertada noloshiisa oo loo yaqaan (cerceriae) wajiga hore ee meertada noloshiisa waxaa laga helaa xuubka beerka ku dhagan ee xawayanada afar calooleeyda ah, wajiga labaad waxaa laga helaa deegaanka xooluhu daaqsadaan sida meelaha calafka xooluhu ka cunaan iyo biyaha eey xooluhu cabaan iyo guud ahaan deegaan nololeedka xoolaha iyo dadka, marka uu noloshiisa dhameystirto waxaa loo yaqaan (FASCIOLA HAPATICA AND FASCIOLA GANGANTICA).



Waa muuqaalka gooryaanka (Cercaria) oo laga helo beerka afar calooleeyda

**2-Waxaa keena cudurkaan (Aetiology)** Cudurkaan waxaa keena gooryaanka (flukeska) noloshiisa labada weji ee ugu horeysa ee loo yaqaan (cercariae) kaasoo gala xuubka beerka iyo xuubkiisa iyo guud ahaan caloosha.

**3-Habka uu u fido cudurkan (TRANSMISSION)**

a) cudurkaan waxaa uu u fidaa marka (cercariaeda) ay gaarto caawska iyo waxaayabaha kale eey xooluhu cunaan, kadibna uu cuno waxyaabahaas



**book-gaan waxaa qoris iyo dib u habayn buuxda ku sameeyay Muhiadin Farah Gedi (mfg) oo ahaa ardayda wax kabartay jaamacadda ummadda soomaaliyeed gaar ahaan kuliyada caafimadka xoolaha. (Bachkii 3aad)**

neef caafimaad qaba (cercariadu) shaqadeedu ayeey halkeedu ka sii wadataa, oo cudurkaan sidaas ayuu ku faafaa.




Waa muuqaaalka gooryaaanka loo yaqaan (faciola hepatica)

**4-Astaamaha cudurkaan (Symptoms)**

b)Cudurkaan waxaa astaan u ah shuban ku yimaada neefka

c) neefka saxaradiisa oo aad u urta

d) culeyska neefka oo is dhima

e) dhiig la’aan degdeg ah oo neefka ku timaadda

f) neefka oo cuntada cuni waaya

6-**Daaweynta cudurkaan (Treatment)**

a) Cudurkaan waxaa lagu daweeyn karaa daawadan loo yaqaan (NEGUVON)
b) Pepirzine
c) livacide